

Tariikhda uu dhintay Jaalle Cali Gababe Moxamed
Waxay ahayd 17/2/73, wuxuna ku dhintay magalada
Xamar Casimadda Jamhuuriyadda Somaliyeed?
Waxaana laga qablooday nafka 12kii saacadood
oo galabtii ah, ayaatuna waxay ahayd sabti.
waxaana la aasay axadda saacadu ay tahay 5;
Aroornimmo. Waxaan Lagu aasay qabuuraha wardhiiglay.
oona loo yaqaano janan da,ud qabrigiisa.
wuxuuna ka dhintay 14 carruur oo leh rag iyo ~~shax~~
dumar. Cali Bababe Wuxuu Ahaa nin caan ah oo ~~shax~~
la yaqaano; wuxuuna madax uu ahaan jiray
dagaalyahaannada u dagaalama gobannimada somali
galbeed; Jaalle Cali gababe xuuu nuqon doona
nin aan la ilaawi doonin tan iyo inti somali
ay dhaqantahay. khas ahaan waxaan ilaawi doonin
dadka oo uu madax u ahaan jiray.
Cali gababe wa nin caan ah wuxuunw diidi jiray
gumeysiga iyo gumeysi csub b; iyo intii la galmaasha
guumeysiyaalkas oo ah ka mid yihiin amxaradu.
Lakiin waxaa jiri doona magaca isa iyo; sharaf tiis.
taasua wuxuu ku mutaytey waddannimadiisa iyo
caadilnimadiisa; ~~xaxiixasho~~
Jaalle Cali Gababe marka u horaysay oo u soo
amaba baxay in uu u dagaallamo waddankiisa
tarikhdu waxay ahayd 12/12/62 bishii disenber.
wuxuunw usoo tallaabay somalia asigoo ka raadsanayo
kaalmo si uu u dafaci lahaa waddankiisa oo uu ka xurayn
lahaa gumeysiga, hasi yeeshe maanta oo ay timid
geeridiisa ma ay suti galin in uu garoo qasadkii
u laha taasuna waxay ku dhacday amarka ilahay
waxaan eebbe u barinayna in uu u naxsiiso uuna
ka waraabsho jannadiisa.

ULIJEEDDO- Waxay tahay wax ku saabsan reerka uu ka dhintay Jaalle Cali Gabae Moxamed.

- 1- Haddaan ahay cabdullahi Xaji Xasan Gababe waxaan ku ogeysiinaya sida aad ogsoon tahay in uu dhintay ~~uu~~ Jaalle Cali Gabae oo madax ka ahaa Gobannima-doonka somali galbeed. Ilaahey naxriistii Janno Hasiyo.
- 2- Wuxuuna ka dhintay Carruur tiradoodu tahay sida, 14- isagu uu dhalay, 3- haween oo Carrurta hooyooyinkood ah, hooyadii isaga dhashay iyo 5- Carruur oo kale ~~uu~~ walaalihiisa ay dhaleen oo isagu uu korinayey Aabiyaashoodna ay laysey amxaradu,
- 3- Waxaan xukuuda tawriga ~~aa~~ aan ka codsanhaya in ay u arimiso inataasoo Carrur ah, arintaasoo ah in Sida;
 - 1- in loo daayo lacagtii qaadan jiray.
 - 2- in waxii xukuumadda awoodeed ah (Kulleegi) la geeyo.
 - 3- intii shaqa qaban kareysana xukuumaddu shaqa siiso.
- 4- Waxaa kale oon ku ogeysinaya in odega qabrigiisu uu u bahan yahay in lugu wareejiyo gidaar, taaso aan kabarinahayo xukuumadda siday horeba ay u xabaashay inay dhamees tirta.
- 5- Waxaa kale aan ku ogeysiinaya in odegu uu ku lahaa beer Ceelwaaq; Taasso inti ka hor xukuumaddu ka weydiistay in gacan lagu siyo Lakiinse ilaa iminkadan wax soo gaarey oo gacan siin ah ayna jirin taasoo ay ka mid tahay dardaarankiisa uu ka tagay in aannu weydiisanno Gacansiin xagga xukuumadda, sida daraadeed ayaa ka barineyna xukuumadda in ay gacan nagu siiso beer taas.

25-2-73;

Qore Waa Cabdullahi Xaji Xasan Gababe

~~aya [X] ibrahim [signature]~~